



*Sooma aha in aan  
ka badbaadino*

# GABADHAADA GUDNIINKA?



**ihmisoikeusliitto**  
FÖRBUNDET FÖR MÄNSKLIGA RÄTTIGHETER



## **Waa maxay gudniinka gabadhaha?**

Gudniinka gabadhaha waxaa loola jeedaa qaliin kasta oo lagu sameeyo xubinta taranka gabdha, kaa oo aan loo sameyn sababo caafimaad awgeed, qaliinkaas waxa uu noqon karaa in la jaro xubinta qeyb kamid ah, dhammaanteed ama in la dhaawaco.



## **Maxay yihiin dhibaatooyinka caafimaad xumo ee laga dhaxlo?**

Dhammaan qeybaha kala duwan ee gudniinka gabdhaha waxaa lagala kulmaa dhibaatooyin caafimaad xumo. Waxaa si degdeg ah loo gala kulmaa dhibaatooyin caafimaad xumo, sida dhiigbax, kaadida oo ku gubto, miyir doorsoomid, geeri degdeg ah iyo infection (Caabuq), dhibaatooyinka caafimaad xumo ee gadaal ka yimaada waxaa ka mid ah caadada oo ay gabadhu ku xanuunsato, caabuq oo kusoo noqd-noqda, dhalmada oo ay dhib kala kulanto (sida, isku furan ama ilmaha oo lagu qalo).



## **Gudniinka gabdhaha waa ka mamnuuc dalka Finland**

Gudniinka gabdhaha waxaa lagu qeexay heshiisyada iyo shuuruucda caalimiga ah ee ka hadlaya xuquuqda haweenka iyo gabdhaha, wuxuuna qeyb ka yahay jir-dilka xagjirka ah ee lagula kaco haweenka, waana dhawac xun oo loo geysto xuquuda biniaadamka ee uu leeyhay qofka.

Dalka Finland gudniinka gabadha waxaad ku muteysan kartaa 10 sano oo xabsi xarig ah. Gudniinka gabdha degan Finland sida uu qabo sharciga dalka Finland waxaad ku muteysaneysaa danbi, xataa haddii loo safriyo gabadha dalka dibadiisa si loogu soo gudo, haba ahaado wadanka loo safriyay wadan laga ogolyahay gudniinkee. Ciqaabta gudniinka gabadha waxey ku dhaceysaa qofka wax guday, kan caawiyay iyo kan dhiiragaliyay.

***Haddii aad u baahantahay warbixin dheeraad ah intaadan ka bixin wadankan Finland, waxaad lasoo xiriiri kartaa Ihmisoikeusliittoon. Haddii loo baahdo, waxaad nagula soo xiriiri kartaa luqada Finnishka ama luqada Englishka Solomie Teshome. [solomie.teshome@ihmisoikeusliitto.fi](mailto:solomie.teshome@ihmisoikeusliitto.fi)  
Tel:+358 44 7420 411***

**ihmisoikeusliitto**  
FÖRBUNDET FÖR MÄNSKIGA RÄTTIGHETER



OIKEUSMINISTERIÖ  JUSTITIEMINISTERIET



**Sisäministeriö**  
Inrikesministeriet



TERVEYDEN JA  
HYVINVOINNIN LAITOS



**Ulkoministeriö**  
Utrikesministeriet